






**Stichting HIMILO**  
Postbus 4443  
2003 EK Haarlem  
Tel: 06-41419114  
Tel: 06-30213162  
[info@himilo.org](mailto:info@himilo.org)  
[www.himilo.org](http://www.himilo.org)  
KvK: 09160117



**Warbixin sanadeedka 2012 Ururka Himilo**  
**Warbixin howlihii la qabtay**  
**Warbixin dhaqaalaha Ururka**



# **Tusmo**

<b><u>HORDHAC</u></b>	<b>3</b>
<b><u>HIMILO</u></b>	<b>4</b>
<b>TAARIIKHDA URURKA</b>	<b>4</b>
<b>UJEEDOYINKA URURKA</b>	<b>4</b>
<b>NIDAAMKA URURKU U SHAQEYO</b>	<b>4</b>
<b>DHISMAHA URURKA</b>	<b>5</b>
<b>GUDDIGA</b>	<b>5</b>
<b>GUDDIGA FULINTA</b>	<b>5</b>
<b>XUBNAHA URURKA</b>	<b>5</b>
<b><u>WAXQABADKA URURKA 2012</u></b>	<b>6</b>
<b>DIB U DHISKA URURKA</b>	<b>6</b>
<b>MASHRUUCA ZAKAATUL-FIRDIGA 2012</b>	<b>7</b>
<b>MASHRUUCA ISKUULKA KULMIYE</b>	<b>8</b>
<b>RAADIN XUBNO CUSUB</b>	<b>8</b>
<b>ARRIMAHA BULSHADA</b>	<b>9</b>
<b>XIRIIRKA URURADA &amp; HAY'ADAHA</b>	<b>9</b>
<b><u>WARBIXIN DHAQAALAHAA SANADKA 2012</u></b>	<b>10</b>
<b>FAAHFAAHIN</b>	<b>10</b>

## **Hordhac**

**HIMILO** waa Urur Samafal oo ay ku bohoobeen Bulshada Soomaliyeed eek u nool waddanka Nederland, kana howlgala Soomaaliya iyo Nederland. Himilo waxaa la aasaasay sanadkii 2006, waxaana loo aasaasay xal u helidda Dhibaatooyinka bulsho ee Ummadda Soomaliyeed ee ku dhaqan Soomaaliya iyo Nederland. Ururku wuxuu si sharci ah uga diiwaangashanyahay dalka **Nederland**. Xarunta ururka waa magaalada **Haarlem**.

Ujeedada warbixintaan waa in Xubnaha Ururka ay la socdaan Waxqabadka Ururka, laguna wargeliyo danleyda Ururka waxyaabihii uu qabtay Ururku sanadka 2012.

Marka hore waxaan warbixin kooban ka bixin doonnaa Taariikhda Ururka, sida uu u dhisan yahay ama u shaqeeyo. Marka xiga waxaan ka hadli doonnaa waxyaabihii la qabtay sanadka 2012. Intaa ka dib waxaan warbixin guud ka bixin doonnaa wixii dhaqaalo ah soo galay Ururka, wixii ka baxay iyo meelaha ay ku baxeen.

# Himilo

## Taariikhda Ururka

Ururka Himilo waa natiijo ka soo baxday fikir ay isku darsadeen saddex qof oo qof walba iskiis howl ama waxqabad isku mid ah ugu mashquulsanaa. Bishii Abril Sanadkii 2006 waxay saddexdii qof isla garteen inay waxqabadkooda isu keenaan ayna ballaariyaan, waxaana sidaa ku unkamay Ururka Himilo. Saddexdii sano ee u horreeysay Ururku horumar badan ayuu sameeyay, iyadoo ka dib uu ku yimid dib u dhac oo ay sabab u ahayd Awooddii Waxqabad ee Xubnaha maamulka oo yaraatay.

Sanadkii 2012, kadib markii codsiyo is daba joog ahi ka imaadeen Bulshada Soomaaliyeed ee ku dhaqan Nederland, gaar ahaan dadka daneeya Waxqabadka iyo Horumarka Himilo, ayaa lagu sameeyay ururka dib u habayn ballaaran. Maamulka sare ee Ururka waa la ballaariyay, Nidaamka Shaqo ee Ururka dib u habeyn ayaa lagu sameeyay. In ka badan 50 xubnood oo si joogta ah Ururka deeq u siiya ayaa Ururka ku soo biirtay. Howlaha ururkana meel wanaagsan ayay marayaan.

## Ujeedooyinka Ururka

Ujeedada guud ee Ururka loo aas-aasay waa dibudhiska iyo Horumarinta Adeegga Aas-aasiga ee Bulshada Soomaaliyeed ee ku dhaqan Soomaaliya sida:

- Kor uqaadidda Tayada iyo kordhinta Goobaha Waxbarashada
- Kor u qaadidda Tayada caafimaadka, sida Abuurista Xarumo Daryeelka Dhallaanka iyo Hooyooyinka
- Kobcinta Tayada Biyaha, sida dayactirid ama samayn Ceelal biyo
- Kor u qaadidda Wacyiga Bulshada, Sida samayn Xarun wax ka qabata Arimaha deg-degga ee Bulsahda sida Abaaraha Cudurada faafa IWM

Ujeedada kale ee Ururka waa xal u helidda Dhibaatooyinka-bulsho ee Bulshada Soomaalida ee ku dhaqan waddanka Nederland.

## Nidaamka Ururku u shaqeeyo

Nidaamka Shaqo ee Ururku wuxuu ku salaysan yahay xaqiijinta Ujeedooyinka Ururka. Howlaha la xiriira dhibaatooyinka-bulsho ee waddankan Nederland wuxuu maamulka Ururka kala shaqaynayaa Xubnihiisa diyaarka u ah inay Ururka iskaa wax u qabso ula shaqeeyaan iyo Hay'adaha-dowliga ama Madaniga ah ee waddankan ka shaqeeya.

Howlaha quseeya wax ka qabadka Baahida-bulsho ee Soomaaliya wuxuu Maamulku la kaashan doonaa Xubnihiisa u leh waaya-aragnimada durugsan meelaha baahiyaha ay ka jiraan iyo baahida wax ka qabadka u baahan.

Baahi walba ee uu Ururku wax ka qabanyo waa in Codsi Qoraal ah Ururka lagu soo gaarsiiyaa, iyadoo ka dib gal (fayl) loo samaynayo. Muddo 4-todobaad gudohood ah ayuu Maamulka Ururku go'aan uga gaarayaa inuu baahidaa wax ka qaban karo iyo inuusan waxba ka qaban karin.

## **Dhismaha ururka**

Ururku wuxuu leeyahay Guddi maamula Waxqabadka iyo Shaqooyinka Ururka. Guddiga Maamulka Guud wuxuu ka kooban yahay 7-xubnood. Todobadan Xubnood waxay iska dhex doortaan Guddiga-fulinta oo ka kooban 3-xubnood oo kala ah Guddoomiyaha, Xoghayaha iyo Hantidhowraha Ururka.

Ururku wuxuu ku talo jiraa inuu samaysto Xubno la-taliyayaal ah iyo iskaa-wax-u-qabsadayaal, si Ujeeddooyinka Ururka loo xaqiijiyo. Sidoo kale Ururku wuxuu ku talo jiraa inuu gudaha dalka Soomaaliya ka samaysto Qof Masuul uga noqda Howlaha uu Ururku Soomaaliya ka fulinayo.

### ***Guddiga***

- Abdullahi Mohamud Jimale
- Shukri Abdulkadir
- Abdikarim Mohamud
- Dahir Ali Ahmed
- Ali Hassan Mohamed
- Mohamed Bashir Osman
- Hamdi Mohamed Siyad

### ***Guddiga fulinta***

- |                            |             |
|----------------------------|-------------|
| • Abdullahi Mohamud Jimale | Guddoomiye  |
| • Shukri Abdulkadir        | Xoghayn     |
| • Abdikarim Mohamud        | Hantidhowre |

### ***Xubnaha ururka***

Dhammaadkii 2012 ururku wuxuu lahaa xubno deeq-bixiyayaal ah. Xubnahaan waxay isugu jiraan kuwo dhaqaale joogta ah bil walba Ururka siiya, kuwa Waqtigooda, Cilmigooda iyo Waaya-aragnimadooda Ururka uga faa'iideeya. Xubnaha Ururka waa lafdhabarta jiritaanka Ururka. Maamulka Himilo wuxuu mar walbak ku dadaali doonaa inuu adkeeyo Xiriirka Xubnaha Ururka .

## **Waxqabadka Ururka 2012**

### **Dib u dhiska ururka**

Ururka Himilo wuxuu dhisan yahay muddo 7 sano ah. Saddexdii sano ee u dambaysay waxaa yaraaday Waxqabadkii iyo Fir-fircoonidii Ururka, waxaana sabab u ahaa Awooddii Shaqo ee Maamulka oo yaraatay. Maamulka Himilo wuxuu muddadaa ku dadaalay in Ururku uusan burburin, Waxqabad badanba yuusan jirine.

Billowgii sanadka 2012 waxaa si isdaba joog ah Maamulka Ururka u soo gaaray codsiyo ay soo gudbinayeen Xubno ka mid ah bulshada Soomaaliyeed ee waddankan Nederland ku dhaqan, danaynayayna waxqabadka ururka. Xubnahaan waxay Maamulka Ururka ka dal-badeen in ururka dib loo kiciyo; maaddaama Baahidii ururka loo aas-aasay ay weli taagan tahay intii horena ka badan tahay. Maamulka Himilo isagoo codsiyadaas ka jawaabaya wuxuu Magaalada Amsterdam ku qabtay Shir ballaaran oo lagu casuumay dhammaan Xubnaha danaynayay jiritaanka Ururka. Shirkaas waxaa ka soo qayb-galay 77 qof oo isugu jiray qaybaha kala duwan ee Bulshada Soomaaliyeed eek u dhaqan waddankan Holland, isla markaana danaynayay jiritaanka iyo Waxqabadka Ururka.

Maamulka Himilo wuxuu soo bandhigay Waxqabadkii Ururka intii uu jiray, sababaha keenay hoos u dhaca Waxqabadka Ururka. Sidoo kale wuxuu Maamulku soo gudbiyay fikirkaada ku aaddan habka dib u noolayn cusub loogu samayn karo Ururka.

Dood dheer ka dib waxay dadkii shirka ka soo qayb-galay isla garteen in la sameeyo guddi-farsamo oo ka kooban 12-xubnood. Guddigan waxaa loo diray inay ka shaqeeyaan habkii Ururka dib u habayn dhinac walba ah loogu samayn lahaa. Inta badan Xubnihii Shirka ka soo qayb galay waxay isla fadhigaas ku ogolaadeen inay Ururka siiyaan deeq joogta ah iyagoo isla gartay in Dhaqaale la,aan uusan ururku waxba qaban karin.

Guddigii-farsamada kulamo badan ka dib waxay soo jeediyeen:

- 1- In la ballaariyo maamulka ururka lagana dhogo 7-xubnood oo ay ka mid yihiin Seddexdii Xubnood ee Ururka aas-aasay.
- 2- In Ujeedooyinka iyo Howlaha Ururka la ballaariyo laguna daro wax ka qabashada Dhibaatooyinka-bulsho ee haysata Soomaalida ku dhaqan waddankan Holland.
- 3- In Guddiga cusub marka la dhammaystiro ay dejiyaan Xeer-hoosaadka Shaqo ee Ururka.
- 4- In Guddiga cusub ay sida ugu dhaqsaha badan isugu yeeraan Xubnaha Ururka si ay ugu wargeliyaan Isbeddelka Ururka.

## Mashruuca Zakaatul-firdiga 2012

HIMILO waxay Xubneheeda Deeqbixiyayaasha ah ka aruurusay zakaatu-lfiriga sanadka 2012. Waxaan aruurinnay 750-Euro oo ah 150-qof Fidradda. Waxaan u kala dirnay Gobolada Galgaduud, Hiiraan, Muqdisho & Shabeellada-hoose.

Gobollada Galgaduud iyo Hiiraan waxaa inooga wakiil ahaa UHUR Development and Welfare Organization oo ka dhisan Magaalada Nairobi. UHUR waa Urur Dhallinyaro, waxay sanad walba Magaalada Nairobi iyo Jaaliyadaha dibadda ka aruuriyaan zakaatul-fidriga, si ay ugu qaybiyaan dadka u baahan eek u dhaqan gobollada Galgaduud, Mudug iyo Hiiraan.

Gobollada Shabeellada-hoose iyo Banaadir waxaa inooga wakiil ah dad aan annaga wakiil uga dhigannay, kalsoonina ku qabnay inay u qaybin doonaan sidii aan ugu tala-galnay.



## Mashruuca Iskuulka Kulmiye

Iskuulka Kulmiye wuxuu ku yaallaa degmada Guriceel ee gobolka Galgaduud, waxaana wax ka barata guud ahaan Arday gaaraysaa 80 Arday oo isugu jira 37 gabdhood iyo 43 wiil. Ma jiraan wax lacag ah oo Ardayda laga qaado. Iskuulka wuxuu ka kooban yahay 2q-fasal 1-xaafiis, 1-musqul iyo darbi dheer oo xiran. Iskuulku wuxuu leeyahay Laba Macallin, maamule iyo kormeere kor ka agaasima.

Xaalka iskuulka wuxuu qarka u saarnaa inuu xirmo. Xubnaha Himilo qof ka mid ah ayaa baahida deg-degga ah ee iskuulka na soo gaarsiiyay, markaan hubsannay in jiritaanka Iskuulku halis ku jirto, hadduu xirmanaa ay 80 arday oo aan awood u lahayn inay lacagta Waxbarasho iska bixiyaan, waxbarasho la'aan ku dhacayso; waxay Himilo ugu deeqday Kulmiye Iskuul lacag 350-dollar ah. Waxaanna Kormeeraha Iskuulka kula talinnay inay xoogga saaraan sidii Iskuulku ku sii shaqayn lahaa.





## **Raadin xubno cusub**

Maamulka Himilo wuxuu sanadka 2012 xoogga saaray isagoo kaashanaya Xubnihiisa sidii lagu heli lahaa Xubno cusub oo Ururka Dhaqaale joogta ah ku taageera. Sanadkii 2012 waxaa inoo suura-gashay inaan helno 55-xubnood oo cusub, kuwaasoo si joogta ah Ururka Dhaqaale u siiya.

## **Arrimaha Bulshada**

Kadib dib u cusbooneeyntii ururka waxaa ururka mar walba la soo xiriirayay xubnihiisa u baahan in laga caawiyo dhibaatooyin kala duwan. Maadaama Ururku lahayn Xafiis lagu yaqaanno waxay Xubnuhu inta badan la soo xiriiraan Maamulka Ururka. Maamulku ayaa ku dadaala habkii dhibaataadaa loo soo gudbiyay wax looga qaban lahaa.

Dhibaatooyinka-bulsho ee sanadka 2012 Himilo wax ka qabatay waxay u badnaayeen:

- **Turjumid:** qof u baahan in laga turjumo; maadaama aysan luuqaddiisu ku filnayn waxa laga hadlayana ay muhiim yihiin.
- **Booqasho:** gaar ahaan dadka xanuunsan ha noqdaan kuwa Isbitaallo ku jira ama Guryohooda ku xanuunsan.
- **Dhibaato gaar ah:** sida dadka bannaanka la soo dhigay oo aan Hoy iyo Nolol heysan.
- **Tolo-siin:** sida arrimaha la xiriira Caymisyada kala duwan, arrimaha Dowladda hoose ee (magic bixinta caruurta), arrimaha Sharciyada, arrimaha Shirkadaha Guryaha IWM.

## **Xiriirka Ururada & Hay'adaha**

Waxaan Sanadkii la soo dhaafay ee 2012 la yeelanay xiriiro Ururo ay ka midyihiin

- Somali World G-18, oo London Saldhigoodu yahay.
- Somali Football Association oo aan u noqonay Wakiil Nederland u fadhiyo.
- Barwaqa Rilief organization oo London fadhigeedu yahay.
- Eu foundation center oo Brussels Xafiiskoodu yahay.
- Jaaliyada reer Biljem.
- Guddoomiyaha gobolka Galgaduud.

## **Codsiyada Mashaariic ee sanadka 2012**

Sanadka 2012 waxaa na soo gaaray Laba codsi oo kala ah Mashruuca Cuuryaamiinta ee Guriceel iyo codsi Iskuul ku yaalla Mareergur. Maadaama maamulka Himilo xilliga codsiyadan soo gaarayeen ay ku mashquulsanaayeen dib u habaynta Nidaamka Shaqo iyo Maamul ee ururka, sidaa awgeed waqti badan uma helin ka jawaabidda codsiyadan.

Maamulku wuxuu isku dayay inuu helo Macluumaad buuxa, si uu codsiyada jawaab uga bixiyo. Go'aanka Waxqabad ee labadan Codsi wuxuu u gudbayaa sanadka 2013.

## Warbixin Dhaqaalaha sanadka 2012

<b>Afrekening 2012</b>			
<b>Debit</b>		<b>Credit</b>	
Saldo per 31-12-2011	€ 1.974,02	Kulmiye school project	€ 290,00
Donateurs (70p)	€ 3.821,00	Zakaatul-fidri project	€ 750,00
verzamelactie	€ 750,00	Activiteitenkost	€ 1.045,43
Overige inkomen	-	Organisatiekosten	€ 395,40
		Bestuurskosten	€ 73,00
		<b>Saldo per 31-12-2012</b>	<b>€ 3.991,19</b>
<b>Totaal</b>	<b>€ 6.545,02</b>	<b>Totaal</b>	<b>€ 6.545,02</b>

### Faahfaahin

**Debit** waxaa ku hoos qoran Qarashka na soo galay iyo halka uu ka yimid. **Credit** waxaa ku hoos qoran halka ay lacaguhu ku bexeen. **Saldo per 31-12-2012** waa lacagta aan haysannay sanadka 2012 markuu dhammaaday.